

Fadlan raac **10 kan tallaabo** si aad u buuxiso xirmada COVID-19 ee guriga adigoo baaris usoo celinaaya.

Tani waa suufka baarista afka & sanko kaasoo u sahlaya ardayda iyo shaqaalaha inay iska baadhaan COVID-19-ka. Qof kasta wuu kusoo qaadi karaa suufka. Carruur badan ayaa awoodi kara inay sidaas sameeyaan iskood iyadoo qof weyni caawinaayo.

- Samee qorshe.** Go'aanso goorta aad xirmada geyneyso dugsigaaga ama Xarunta Qiimeynta CHEO ee Brewer Park. Qorshee inaad samayso suufka 30-60 daqiiqo ka hor. Waxay kugu qaadan doontaa qiyaastii 15-20 daqiiqo inaad akhrido tilmaamahan, daawato fiidiyowga, samayso suufka, iyo buuxinta foomka diiwaangelinta. Ha cunin hana cabbin, xanjo ha calallin, ha cabin sigaar ama ha cadayan ilkahaaga 30 daqiiqo ka hor suufka.
- Alaabtaada diyaarso.** Waxaad u baahan doontaan alaabooyinka soo socda:
 - Xidhmadaada baadhista oo ay ku jiraan suuf, tuubbo, leebal, iyo Foomka Diiwaangelinta Baadhista
 - Gacmo-nadiifiye iyo waraaqaha leysku masaxo
 - Kaarkaaga caafimaadka (haddii aad mid leedahay) iyo CHEO MRN (haddii aad taqaanno)
 - Kombiyuutar ama taleefan leh gelitaanka internet (ikhtiyaari)
 - Boorsada qadada ama qaboojiye daboolan, oo lagu daray baakad baraf ah si waxyaabaha loo qaboojiyo inta lagu jiro safarka
- Akhri tilmaamaha ku yaalla boggan gadaashiisa adigoo daawanaya Fidiyowga Baarista Suufka.**


<https://youtu.be/nZOLJIBs7M>
- Ku tababaro faashadda madaxa-Q kahor intaadan samayn suufka dhabta ah.** Tani waa muhiim haddii qofka la baarayaa uu yahay mid naxsan, weligiisna baaris hore samaynin, waayo-aragnimo xun ayuu hore u lahaa xagga NP-ga, ama waa ilmo ka yar 10 oo doonaya inuu isagu sameeyo suufka (qof weyni caawinayo).
- Buuxi foomka diiwaangelinta.** Haddii ay suurtagal tahay onleyn ku buuxi foomka diiwaangelinta haddii aad heysato kombiyuutar/taleefan. Haddii kale, buuxi dhammaan Foomka Diiwaangelinta Baarista.
 

<https://redcap.link/SampleRegistration>
- Leebalka ku daabac magacaaga iyo taariikhda dhalashada.**
- Samee suufka.** Si dhow ula soco tallaabooyinka, sida ka muuqata xagga dambe ee boggan. Hubi in daboolku uu aad u adag yahay oo leebalka magacaagu ku lifaaqan yahay tuubada.
- Waxoo dhan ku rid kiishka.** Suufka ayaa lagu lingaxay jeebka gudaha. Foomka Diiwaangelinta (xitaa haddii aad ku buuxisay internetka) waa in la laalaabo oo lagu rido jeebka dibedda si magacaaga loo arko.
- Ku hay QABOW.** Fadlan xirmada ku rid boorsada qadada oo daboolan ama qaboojiye, oo ay weheliso baakad yar oo baraf ah, si ay qabow u ahaato ilaa aad geyneyso. Haddii dib u dhac jiro, fadlan xirmada ku rid qaboojiyahaaga ilaa aad ka baxdo gurigaaga.
- Meesha gee.** Waxaad ku celin kartaa dugsigaaga am keen xagga Xarunta Qiimeynta **CHEO ee Brewer Park** saacadaha shaqada.

Waad Dhameysay!

Waadku mahadsantay is-baadhista

Xarunta Qiimeynta CHEO ee Brewer Park

151 Brewer Way, Ottawa, ON K1S 5T1

Saacadaha Shaqada:

10 subaxdii – 5 galabnimo Isniin - Jimce

8 subax – 3 galabnimo Sabti - Axad

THK Instructions EN - 2021/08/16


Tilmaamaha loogu talagalay Afka & Sanka oo leysku daray

1 Suufka ka saar kiishka. Ha cabin dareeraha.

Halkan ka daawo Fidiyowga Suufka ee CHEO:
<https://youtu.be/nZOLJIBs7M>





2 Suufka ka saar baakada adigoo qabanaya usha dhexda meesha laga jebiyo ee godka yar leh


3  Soo saar carrabkaaga oo si xoog leh ugu samee suufka 5 wareeg carrabkaaga gadaashiisa


4  Si xoog leh suufka ugu xoq gudaha dhabannadaada 5 jeer

5  Sidoo kale ku samee dhabankaaga kale

6  Isbuunyada suufka oo dhan (1 cm) geli daloolka sankaaga oo kusoo xoq wareegga dhan 5 jeer

7  Ku samee si la mid ah daloolka kale ee sankaaga kale ee sankaaga

8  Suufka ku rid tuubbo oo ka soo jebi leynka. Adkee daboolka. Ha cabin dareeraha!

9  Calaamadda magacaaga iyo taariikhda dhalashada ku dheji tuubada si gudub ah